



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Sibtambar 10, 2021-ka

Ku socota: Ku socota: Daryeel Bixiyayaasha iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Tilmaamaha ku saabsan Xeerka Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka iyo Amarka Fulineed ee 21-29

Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ayaa dhawaan soo saaray tiro ah waxyaabo la xiriira Xeerka Maamulka 333-019-1010 [Xeerka Maamulka 333-019-1010](#), ama Shuruudaha Tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay Daryeel Bixiyayaasha Caafimaadka iyo Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka ee ka tirsan Goobaha Daryeelka Caafimaadka, iyo sidoo kale [Amarka Fulineed ee 21-29](#) ee la xiriira shuruuda tallaalka ee shaqaalaha gobolka.

Waxaa jira [farriinta wax gudbinaysa ee AR 21-080](#), [Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo \(FAQ\) ee ku saabsan Shuruudaha Tallaalka ee loogu talagalay Daryeel Bixiyayaasha Caafimaadka](#) oo laga soo qaatay su'aalaha ka socda daryeel bixiyayaasha naafanimada korriinka iyo hay'adaha maamulka kiiska, iyo Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo [oo ka duwan Amarka Fulineed](#). Waxaa sidoo kale jira [qaab muujinaya xeerka tallaalka iyo Amarka Fulineed](#) oo ku saleysan nooca goobta iyo [socodka shaxanka](#). Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo waa la turmujay waxaana la soo geliyay [bogga internet-ka ee ODDS COVID-19](#) oo hoos yimaada ilaha daryeel bixiyaha "provider resources."

ODDS ayaa sidoo kale qabanaysa kulamada dhanka internet-ka si ay macmuulaad kugu soo bandhigto daryeel bixiyayaasha kaasi oo ku saabsan shuruuda shaqaalaha daryeelka caafimaadka.

Kulanka dhanka internet-ka ee loogu talagalay **bixiyayaasha daryeelka guriga dadka waayeelka ah ee I/DD** waxaa la qaban doonaa **11 subaxnimo**.

Arbacada, Sibtambar 15, 2021. Kulanka dhanka internet-ka waxaa lagu soo bandhigi doonaa macluumaad la xiriira Xeerka Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka ee OHA kaasi oo sidoo kale ku jira Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo oo ku xiran 'linked' farriintani. [Hore iskaga sii diiwaangeli internet-ka.](#)

Kulanka dhanka internet-ka ee loogu talagalay **daryeel bixiyayaasha guryaha la degan yahay 24 saacadood** waxaa la qaban doonaa **1 galabnimo.**

Arbacada, Sibtambar 15, 2021. Kulanka dhanka internet-ka waxaa lagu soo bandhigi doonaa macluumaad la xiriira Xeerka Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka ee OHA kaasi oo sidoo kale ku jira Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo oo ku xiran 'linked' farriintani. [Hore iskaga sii diiwaangeli internet-ka.](#)

ODDS waxay eegaysaa hab kasta oo suurtoagal ah si loo taageero bulshada daryeel bixiyaha ah iyo Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah ee u adeega dadka qaba I/DD. Mudnaantu waxaa leh caafimaadka iyo badbaadada dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.